

XAL U HELIDDA DHIBAATOYINKA SOO WAJAHA DADKA CUSUB EE YIMAAD: HORUMARINTA HELITANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Qorshaha shanta qaybood ka kooban ee lagu horumarinayo helitaanka daryeelka caafimaadka iyadoo la ansixinayo shahaadooyinka takhaatiirta caalamka wax ku soo bartay:

1. Dardar gelinta, fududeynta iyo casriyeenta nidaamka loo diiwaan geliyo takhaatiirta ka shaqeysa Canada, Mareykanka ama dalalka la nooca ah nidaamkayaga ee daryeelka caafimaadka;
2. In laga caawiyo takhaatiirta caalamka wax ku soo baratay in ay Ontario kaga shaqeeyaan takhtarnimo iyadoo loo sameynayo shati ku meel gaar ah oo loogu oggolaanayo iyadoo dusha lagala soconayo inta ay ka dhammeysanayaan waxbarashada ama ay ka helayaan waayo aragnimada takhasuskooda.
3. In si habboon loo qiimeyo si loogu oggolaado takhaatiirta caalamka wax ku soo bartay si ay hore ugu sii wataan waxbarashadooda iyo sidii ay uga qayb gali lahaayeen nidaamka hawlaha caafimaadka ee Ontario;
4. In si gaar ah taageero looga siiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin barashada dhaqanka iyo luqadda, latalin iyo tababar wax ku ool ah;
5. In si gaar ah loo taageero kuwa doonaya in aqoonta caafimaadka ay caalamka ka soo barten ugu beddeshaan wax kale oo ka tirsan aqoonta caafimaadka ama xirfad u dhiganta.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho Warbixinta Broten, waxaad fadlan eegtaa bogga internetka: www.health.gov.on.ca